

War Saxaafadeed

Gurmad Degdeg ah oo Bina-aadamnimo ayaa ka jira Gobollada Shabeellooyinka ee Soomaaliya Iyadoo lagu Jiro Xaalad Colaad Sokeeye oo Sii Kordhaysa

Waxa la soo saaray 14ka Bisha 8aad, 2007

Waxa wadajir u soo ssaaray Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya (FAO/FSAU) iyo FEWSNET Soomaaliya

Xaaladda Hubinta cuntada iyo nafaqadu si weyn ayay uga sii daraysay taniyo bishii Saddexaad gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe ee Soomaaliya oo guud ahaan ah gobollada ugu adkaysiga badan, isla markaana ah 'kuwa cuntada ugu badani ay ka soo baxdo' dalka. Gobolladani waxay la ciireen saamaynta waxyaabo badan oo naxdin leh dartood oo ay ku jiraan soosaarka midhaha/firidda oo ahaa kii ugu hooseeyey muddo toban sannadood ah (44% celceliska dagaalka Kadib) roobabkii xilliga Guga oo caadi ka hooseeyey, sicir-bararka oo heerar sare gaadhay (40% illaa 60% saddexdii bilood ee u dambeeyey), howlaha ganacsiga iyo dhaqaalaha oo qasmay, tiro badan oo sii kordhaysa oo ah dadka ka soo qaxay Muqdishu oo isugu uruuray gobolladaas, xaaladaha caafimaadka oo sii xumaanaysa kadib markuu dillaacay cudurka shuban biyoodku iyo colaadda sokeeye ee sii kordhaysa. Dhammaan waxyaabahaas naxdinta lehi waxay keeneen in muddo gaaban gudaheed uu yimaaddo **Gurmad Degdeg ah oo Bina-aadamnimo oo ay wehliyaan heerar sare oo nafaq-darro aad u xun iyo mid halis oo saamaynta in ka badan 600,000 oo qof oo jooga gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe iyo Muqdishu.**

Natiijooyinka ka soo baxay qiimayntii gudaha laga sameeyey ee xilliga Guga 2007 oo hadda ay soo saareen FSAU iyo FEWSNET iyo hay'adaha ay isbahaystaan, waxay xaqiijinayaan in inkastoo gobollada ay abaaraha iyo daadadku saameeyeen, oo ay ku jiraan Jubbooyinka iyo Gedo ay fiicnaadeen, haddana tirada guud ee dadka u baahan gargaar Soomaaliya way korodhay taniyo bishii saddexaad sababtoo ah xaaladda bina-aadaminada oo sii xumaanaysa gobollada shabeellooyinka. **Tirada dadka u baahan gargaar bina-aadamnimo waxay ka korodhay 1 milyuun oo waxay gaadhay 1.5 milyuun.** Tiradan ah 1.5 milyuun oo qof, **295,000 ka mid ahi waxay ku jiraan Gurmad Bina-aadamnimo** waxana ay u baahanyihiin waxqabadyo lagu badbaadinayo noloshooda, iyadoo **490,000 qofna ay ku jiraan Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** waxana ay u baahanyihiin taageero hab-nololeedka ah. Waxa intaas dheer, waxa jira 325,000 oo qof oo dhowaan ka soo barakacay Muqdishu iyo 400,000 oo horeba u barkacsanaa oo labaduba u baahan waxqabadyo lagu badbaadinayo noloshooda iyo hab-nololeedkooda (eeg Khariidadda iyo Sanduuqa Dadweynaha ee ku yaalla bogga dambe).

Badi ama 85% dadka lagu tilmaamay inay ku jiraan Gurmad Bina-aadamnimo iyo 31% lagu tilmaamay inay ku jiraan Xiisad Cutnada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun waxay joogaan gobollada Shabeellooyinka. Baadhitaannada dhowaan la sameeyey ee nafaqadu waxay xaqiijinayaan in heerar ka nafaqa-darrada aadka u xun ee ka jira gobollada Shabeellooyinka ay iminka ka sarreeyaan heerar gurmadka (GAM > 15%), waxa kaloo jira heerar aad u sarreeya oo nafaqa-darro halis ah (SAM > 4.0%). Waxa loo baahanyahay gargaar bina-aadamnimo oo degdeg ah oo is kaba oo ay ku jiraan cunto, biyo nadiif ah, adeegyo caafimaad, hoy iyo faya-dhowr, iyo weliba ilaalin ku aaddan lumittaanka hantida hab-nololeedka si loo hubiyo dib-u-soo-kabasho aayaha dambe. "Waxa muhiim ah in loo doodo sidii loo joojin lahaa dagaalka sokeeye loona samayn lahaa xasillooni siyaasadeed oo heer kasta ah" ayay tidhi Cindy Holleman, Lataliyaha Sare ee Farsamada ee Ururka Cuntada Adduunka ee Jimciyadda Quruumaha ka Dhaxaysa u qaabilsan FSAU "si loo fududeeyo fursad u helid sidan ka weyn oo bina-aadamnimo, loo dhiirrigeliyo dib-u-billaabidda howlaha dhaqaalaha, loogana hortago in xaaladdu ay sii xumaato oo noqoto xiisad bina-aadamnimo oo tan baaxaddeeda iyo heerkeedu ka sii weyn yahay."


Natiijooyinka kale ee ka soo baxay qiimayntii guduuhu waxay xaqiijinayaan in xaaladda hubinta cuntada ee dhulka webiyada iyo goobaha beero-iyoo-xoola-dhaqatada ee gobolka Hiiraan ay ku sii waddo inay sii xumaanaysa. Dhinaca wanaagsan, qiimayntu waxay muujinaysaa horumar ah qaybo ka mid ah gobollada Jubbada Hoose iyo Dhexe iyo Gedo maddaama ay bulshooyinka ku wadaan inay dib uga soo kabanayaan saamayntii abaartii 2005/6 iyo daadadkii Deyrtii 2006/7. Hase yeeshee weli waxa jirta in baahi weyn loo qabo gobolladaasi in laga sameeyo waxqabadyo qaybaha ah oo xeelad ku dhisan si loo kaalmeeyo dib-u-soo-kabashada hab-nololeedyada waxna laga qabto arrimaha ka dambeeya dhibaatooyinkan sida dhibaatooyinka joogtada ah ee fursad-u-helidda biyo nadiif ah, daryeel caafimaad, iyo qaababka dareeylka oo liita. Haddii aan wakhtiga ku habboon lagu samayn jawaab-celin xeelad ku dhisan bulshooyinkaasi waxay ku wadi doonaan inay u nuglaadaan xiisad bina-aadamnimo.

Si aad u heshid war dheeraad ah eeg bandhigga arrimaha muhiimka ah ay FSAU ka samaysay oo Af Ingriisi ah oo aad ka heli doontid Websaytko FSAU (www.fsau.org) ama la soo xidhiidh FSAU (fsauinfo@fsau.org). Warbixin gaar ah oo Hubinta Cuntada iyo Nafaqada ah iyo Warbixinta Bishii ee Nafaqada ayaa la soo saari doonaa toddobaadkan.

Cimilada
Suuqyada
Nafaqada
Beeraha
Xoolaha
Arrimaha
Gobolka ee
Soo
Shaacbaxaya

Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka:
+254 20 374 5734
Faakiska:
+254 20 374 0598
Email:
fsauinfo@fsau.org
www.fsau.org

Falanqaynta Xaaladda Hubinta Cuntada ee Somaaliya: Saadaasha Guga '07 Kadib, Bisha Toddobaad - Laba iyo Tobnaad 2007



1. Xerada dadka soo barakacay ee Kala Gooye, Jowhar, Shabeellada Dhexe: qoys barkacay oo cunaya bukuray, Bishii Toddobaad ee 2007.
2. Xero dadka barakacay, Jawhar, Shabeellada Dhexe, bishii Toddobaad 2007.

Falanqaynta Xaaladda Hubinta Cuntada ee Somaaliya: Tirada Dadwyne ee Guga '07 Kadib, Bisha Toddobaad - Laba iyo Tobnaad 2007

Gobollada saamoobay	Wadarta Dadwynaha ee UNDP 2005 ¹	Dadweynaha la qiimeeyey iyo kuwa Qorshaha Degdegga ah ee ku jira XCHAX iyo GB		
		Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) ²	Gurmada Bina-aadamnimo (GB) ²	Wadarta dadweynaha ku jira XCHAX ama GB oo % Dadweynaha gobolka
Waqooyi³	2,341,718	0	0	0
Dhexe	680,156	0	0	0
Koonfur				0
Bakool	310,627	80,000	0	26
Baay	620,562	5,000	0	1
Gedo	328,378	80,000	30,000	33
Hiiiaan	329,811	30,000	15,000	14
Jubbada Dhexe	238,877	65,000	0	27
Jubbada Hoose	385,790	80,000	0	21
Shabellada Dhexe	514,901	60,000	85,000	28
Shabellada Hoose	850,651	90,000	165,000	30
Isku-dar (Koonfur)	3,579,597	490,000	295,000	22
Banadir	901,183			
WADARTA GUUD	7,502,654	490,000	295,000	10

Dadwynaha dhulka miyiga ah jooga ee la qiimeeyey ee ku jira XCHAX ama GB	785,000	10⁵
Qiyaasta tirada dadka cusub ee barakacay taniyo bishii Afraad ee 2007	325,000	4⁵
Qiyaasta tirada dadkii hore u barkacanaa	400,000⁴	5⁵
Qiyaasta wadarta dadweynaha ku jira xiisad	1,510,000	20⁵

1 Waxa laga soo qaatay: Qiyaasaha Dadweynaha oo ah heer Gobol/Degmo, UNDP Soomaaliya, Ida bisha Siddeedaad, 2005. Xusuuso in tan ay ku jiraan tirada dadweynaha saamoobay oo ah heer gobol. FSAU ma soo koobto qiyaasaha dadweynaha maddaama ay yihiin qiyaaso rasmi ah oo ay bixisay UNDP
 2 Tirada qiyaasta ah waxa lagu soo koobay shanta kun ee ugu dhow, waxana ay ku salaysantahay dadka deggan goobtaas laakiin xisaabta laguma darin dadka meelaha kale iminka ka soo guuray ama la fi layo, waxana ku jira dadweynaha halis sare ugu jiray XCHAX ama GB ujeedooyinka xagga qorshaha dartood
 3 Daan Gorayo waxa lagu daray Gobolka Bari kadib markii sidan hore loogu sameeyey xogta dadweynaha ee UNDP/WHO ka hor 2005
 4 Waxa laga soo qaatay: UN-OCHA oo la cusboonaysiiyey bishii Afraad ee 2004 (376,630) iyo khariidadda Dadka Gudaha ku Barakacay ee UNHCR bisha Laba-iyto-bonnaad ee 2005 (407,000), oo lagu soo koobay 400,000 qiyaasahaan
 5 Boqolkiiba wadarta dadweynaha Soomaaliya oo lagu qiyaasay 7,502,654 (UNDP/WHO 2005)